

Dukumintiga qorshaynta daryeelka mustaqbilka oo badanaa laga isticmaalo Queensland

Maaraynta Caafimaadka Mustaqbilka (Advance Health Directive)



Kani waa dukuminti sharci ah kaas oo sheegaya go'aanadaada oo jahaynaya daryeelkaaga caafimaad ee mustaqbilka xaallado mucayina waqti laga yaabo in aadan awoodin samaynta go'aan iyo la xiriirid. Waxaa waajibba inuu saxiixo dhakhtarkaagu, wakiilka qaynuunka isla markaana laga markhaanti kacay. Foomamka waxaa laga helli karaa justice.qld.gov.au.

Awooda biya-kama dhibcaanka ah ee Qareenka (Enduring Power of Attorney)



Kani waa dukuminti sharci ah kaas oo magacaaba shakhsi ama dadka aad adigu rabto si ay kuugu sameeyaan adiga go'aama muhiima marka adigu aadan awoodin inaad sidaas samayn karto. Waa in uu saxiixaa wakiilka qaanuunku iyo weliba shakhsi ama shakhsiyad aad adigu dooranayso. Foomamka waxaa laga helli karaa justice.qld.gov.au ama la hadal garyaqaanka ama Public Trustee

Caddaynta Rabitaanada (Statement of Choices)



Dukumintigaani wuxuu diirada saarayaa waxaad doonayso, qayimka iyo waxaad aaminsan tahay. Waxay caawimi kartaa kuwa kuugu dhowi inay sameeyaan go'aanada daryeelka caafimaad iyaga oo magacaaga ku hadlaya, haddii loo baahan yahay. Wuxuu siiyaa xasilooni adiga iyo kuwaad jeceshahay. Waxaa waajibba inuu saxiixo dhakhtar. Foomamka waxaa laga helli karaa cinwaanka ah mycaremychoices.com.au, la hadal dhakhtarkaaga guud, ama la xiriir Xafiiska Qorshaynta Daryeelka Mustaqbilka.

Xafiiska Qorshaynta Daryeelka Mustaqbilka

Xafiiska Qorshaynta Daryeelka Mustaqbilka, Daryeelka-Caafimaadka Queensland, waa lacag la'aan waana adeeg qarsoodi ah oo dhamaan dadka reer Queensland si looga caawimo habka qorshaynta daryeelka mustaqbilka, kuwaas oo ay ku jiraan:

- Macluumaadka isku xiran ee qaababka bixinta qorshaynta daryeelka mustaqbilka
- Talasiinta cida lala hadlayo wixii ku saabsan qorshaynta daryeelka mustaqbilka ee goobahaaga maxaliga ah
- Ku darida koobiyada dukumintiyada qorshaynta daryeelka mustaqbilka ee diiwaankaaga Caafimaadka Queensland
- Ka jawaabida dhamaan su'aallahaaga qorshaynta daryeelka mustaqbilka

La xiriir Xafiiska Qorshaynta Daryeelka Mustaqbilka

☎ 1300 007 227

📠 1300 008 227

✉ PO Box 2274, Runcorn Qld 4113

@ acp@health.qld.gov.au

🌐 mycaremychoices.com.au

Mutarjum ayaa laga helli karaa xafiiska waqtiyada shaqada si loo siiyo macluumaad iyo tabaha ku saabsan Qorshaynta daryeelka mustaqbilka ee Queensland:

Wac 13 14 50



Interpreter

- Sheeg luqadaad ku hadasho
- Weydii in lagugu xiro Xafiiska Qorshaynta Daryeelka Mustaqbilka oo ah **1300 007 227**.

Daryeelkayga, Rabitaankayga

Haddii si lama filaana shil kuugu dhaco ama aad u xanuunsato, sidee shaqaalaha caafimaadku ku ogaanayaan sidaad ka doonayso in daryeelkaaga caafimaadku ahaado?



Awood geli naftaa si aad u qorshayso daryeelka caafimaadka ee mustaqbilkaaga

mycaremychoices.com.au

OACP

Statewide Office of Advance Care Planning



Queensland Government

Waa maxay qorshaynta daryeelka mustaqbilku?



Qorshaynta daryeelka mustaqbilku waa habka ka fekerida la xiriirida wixii aad ka damacsan tahay daryeelka caafimaadkaaga. Daryeelka qorshaha mustaqbilka waxaa la isticmaalaa xaalladaha aadan awoodin in aad adigu naftaada u hadasho.

Qorshaynta daryeelka mustaqbilku khasab maaha wuxuu lug ku yellan karaa:

- Ka fekerida iyo kala hadlida qayimkaaga, xalalka daryeelka caafimaadka iyo tayada waxaad ka rabto nolashaada kuwa aad aaminsan tahay
- Magacaabida qof, ama ka badan, oo bedelaya go'aan samay-yayaasha iyaga oo magacaaga ku hadlaya, haddii loo baahdo
- Ku qorida waxaad ka jeclaan lahayd daryeelka caafimaadkaaga dukuminti.

Sida samaynta Dardaaranka, qorshaynta daryeelka mustaqbilku waa qayb ka mid ah qorshaynta mustaqbilka.

Maxaad horay ugu qorshaynaysaa?



Qorshaynta daryeelka mustaqbilku wuxuu xaqiijiyaa:

- Daaweynta iyo daryeelka aad hesho wuxuu ka tarjumaa waxaad jeclaan lahayd
- Kuwaad jeceshahay ayaa og waxaad rabto haddii ay tahay inay go'aan ku sameeyaan magacaaga
- Go'aanada daryeelka caafimaadka lama sameeyo keliya marka wax dhacaan.

Diyaar ma u tahay qorshaynta?

Talaabada 1aad – Ka hadal



Waxay noqon kartaa wax adag inaad ka hadasho waxa laga yaabo inaad rabto haddaad aad u jirato, laakiin waxay ku siin kartaa, adiga iyo kuwa ku jecel, amaan maskaxeed hadday og yihiin waxaad rabto.

Ka dib markaad ka fekerito waxaad ka damacsan tahay daryeelka caafimaadka mustaqbilkaaga:

- Kala hadal xaallada caafimaadkaaga dhakhtarkaaga iyo siday kuu saamaynayso mustaqbilka
- Kala hadal dhakhtarkaaga waxaad ka damacsan tahay waxaad ka rabto qoyskaaga iyo kuwa dadka kuugu dhow
- Weydii qofka/dadka aad aamintay inay noqdaan kuwa go'aanka ku samaynaya magacaaga, haddii loo baahdo.

Talaabada 2aad - diiwaangeli



Diiwaanka geli waxaad doonayso iyo go'aanada adiga oo buuxinaya hal ama ka badan kuwaan soo socda:

- Awaamiirta Caafimaad ee Mustaqbilka
- Awooda Qareenka ee waaraysa
- Cadaymaha Rabitaanka

La soo deg dukumintigaan lacag la'aan:
mycaremychoices.com.au

Talaabada 3aad – wadaagid



Xaqiiji in rabitaanka dukumintiga daryeelkaaga caafimaadku ay og yihiin kuwa ku daryeelayaa.

La wadaagida waxaad doorbidaysa:

- Sii koobiyada dukumintigaaga kuwaad aaminsan tahay (sida xubnaha qoyska, saaxiibada kuugu dhow, qofka/dadka go'aanka kuu samaynaya iyo kuwa bixiya daryeelkaaga (sida Dhakhtar Guud)
IYO
- Sii koobiyada dukumintigaaga Xafiiska Qorshaynta Daryeelka Mustaqbilka in lagu daro diiwaanka Caafimaadka Queensland (**dusha kala soco xalalka**)
- Kala soo deg dukumintiga Diiwaanka Caafimaadkaaga myhealthrecord.gov.au

Talaabada 4aad – dib u eegid



Waa muhiim inaad dib u eegto Qorshaynta Daryeelka Mustaqbilka si joogto ah, khaasatan haddii xaalkaaga caafimaadku isbedelo ama haddii aad bedesho waxaad ka rabto daryeelkaaga caafimaad.

